

Tallooyinka Tallaalka COVID-19 ee La cusboonaysiiyay ee loogu talagalay Carruurta jirta 6 bilood - 4 sano



Wuxuu tallaalka COVID-19 ee la cusboonaysiiyay 2023-2024 ka ilaalin karaa carruurta yaryar xanuunada daran, isbitaal dhiggista, iyo xitaa dhimashada ay sababto COVID-19. Daraasaduhu waxay muujiyeen in iyadoo tallaalka COVID-19 ay waxtar sii leeyihiin, waxaa lala xiriiriyey hoos udhac kuyimaada difaacooda muddo kadib.

La socoshada xaaladaha ku saabsan tallaalka COVID-19 ayaa ah habka ugu waxtarka badan ee lagu sii wadi karo difaacaan. Eeg jadwalka hoose si aad u aragto inta kuurooyin ee ilmahaagu u baahan yahay si uu u helo difaaca buuxa ee COVID-19.

Nooca Tallaalka	Da'da	Kuurooyinka Carruurta Aan La Tallaalin	Carruurta Hore u Qaadatay Tallaalka COVID-19
Pfizer	6 bilood - 4 sano jir	<p>Kuurada 1aad: Tallaalka la cusboonaysiiyay 2023-2024.</p> <p>Kuurada 2aad: Tallaalka la cusboonaysiiyay 2023-2024 3-8 ee toddobaad kadib kuurada 1aad.</p> <p>Kuurada 3aad: Tallaalka la cusboonaysiiyay 2023-2024 ugu yaraan 8 toddobaad kadib kuurada 2aad.</p>	<p>Haddii aad qaadatay hal qiyaas oo hore: kuurada 2aad ee tallaalka la cusboonaysiiyay 2023-2024 ee 3-8 toddobaad kadib kuurada koowaad.</p> <p>Kuurada 3aad ee 8 toddobaad kadib kuurada 2aad ee tallaalka La cusboonaysiiyay 2023-2024.</p> <p>Haddii aad qaadatay labo kuurooyin ama in ka badan: kuurada 1aad ee tallaalka la cusboonaysiiyay 2023-2024 ee ugu yaraan 8 toddobaad kadib kuuradii ugu dambaysay.</p>
Moderna	6 bilood - 4 sano jir	<p>Kuurada 1aad: Tallaalka la cusboonaysiiyay 2023-2024.</p> <p>Kuurada 2aad: Tallaalka la cusboonaysiiyay 2023-2024 4-8 ee toddobaad kadib kuurada 1aad</p>	<p>Haddii aad qaadatay hal kuuro oo hore: kuurada 1aad ee 4-8 todobaad kadib kuurada ugu danbaysay ee la cusboonaysiiyay 2023-2024.</p> <p>Haddii aad qaadatay laba kuurooyin ama ka badan: kuurada 1aad ee 4-8 todobaad kadib kuurada ugu danbaysay ee la cusboonaysiiyay 2023-2024.</p>
Novavax	Novavax looma heli karo qof kasta oo ka yar da'da 12.		

Haddii difaacaga jirku u liito si heer dhexe ama heer daran ah, tilmaamaha lagu siinaayo waa ay kaladuwanaan doonaan.

*Dadka uu dhawaan ku dhacay caabuqa SARS-CoV-2 waxa laga yaabaa inay tixgeliyaan **dib u dhigista kuurada tallaalka COVID-19 muddo 3 bilood ah laga bilaabo bilawga astaamaha ama baaritaanka muujinaya in qofka laga helay caabuqa (haddii caabuqu ahaa mid aanan astaamo lahayn). Daraasaduhu waxay muujiyeen in waqtiga udhaxeeya caabuqa iyo tallaalka oo kordha ay ka dhalan karto inuu kordho ka jawaabista difaaca jirka ee tallaalka. Sidoo kale, halis yar oo ah inuu caabuqu dib ugu soo laabto ayaa la arkay toddobaadyada ilaa bilaha kadambeyna caabuqa. Arrimaha gaarka ah sida halista [xanuunka daran ee COVID-19](#), [heerka COVID-19 ee bulshada](#), ama calaamadaha muujinaya inay jiraan caabuqa SARSCoV-2 oo tiro badan waa in xisaabta lagu darsadaa marki la go'aansanaayo in qaadashada kuurada dib loo dhigo iyo inkale qaadashada kadib soo ifbaxa caabuqa.**

